Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic Of Somalia
The Upper House
Office Of The Speaker

Ref: 137/18 :الرقم

Taariikh: 21/03/2018 :التاريخ

JAMHUURIYDDA FEDERAALKA SOOMALIYA
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMALIYA

GUDDIGA AQALKA SARE EE XAL U RAADINTA KHILAAFKA GOLAHA SHACABKA

# BAAQA KOOWAAD

Iyadoo la tixraacayo Go'aankii Guddiga Joogtada ah ee Aqalka Sare **134/18** soo baxay Maarso 17, 2018, kaasoo lagu magacaabay Guddi ka qayb qaata xal u raadinta khilaafka soo kala dhex-galay Guddoonka Golaha shacabka iyo xildhibaannada kala taageersan.

Iyadoo Guddigu uu weli shaqadi ku gudo jiro, ayaa waxa uu arkay inay muhiim tahay in Ummadda Soomaaliyeed uu la wadaago waxa u qabshoomay ilaa iyo hadda iyo halka ay wax marayaan.

Guddiga isagoo gudanaya waajibaadka dastuuriga ah eek u cad **qodobka "61" farqaddiisa "1aad"** waxa uu guda galay gudashada xilka loo igmaday.

Guddigu waxa uu kulamo kala duwan la qaatay dhammaan madaxda Qaranka ee ay khusayso xal u raadinta khilaafkan soo kala dhex galay Golaha shacabka ee Baarlamaanka Federalka Soomaaliya.

Masuuliyiinta Guddigu kulanka la qaatay waxaa ka mid ah:

- Mudane, Maxamed Cabdillaahi Maxamed (Farmajo) - Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya,
- Mudane, Maxamed Sh. Cusmana (Jawaari) - Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS.
- Mudane, Cabdi wali Sh. Ibraahim Muudeey - Guddoomiye xigeennada Golaha Shacabka ee BFS.
- Mudane; Xasan Cali Khayre – Wasiirka Kowaad/Raiisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

KM-0, Degmada Shibis, Benaadir, Mogadishu-Somalia
Office landline +2521643620 - Mobile +252-612399992
abdi.hashi@senate.gov.so - info@senate.gov.so - speaker@senate.gov.so
www.senate.gov.so

## LA KULANKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACABKA IYO GUDDOOMIYE XIGEENKA 2AAD

Maarso 17 2018, guddigu waxa uu kulamo la qaatay Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo ku Guddoomiye Xigeenka labaad, falanqeyn iyo xog-waran ku wajahan sida khilaafku ku bilowday iyo sida ugu haboon ee xal lagu gaari karo.

Guddigu waxa uu Guddoomiyaha ka codsaday in loo hoggaansamo shuruucda u yaal Golaha Shacabka sida Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka Baarlamaanka Federalka Soomaaliya iyo Dastuurka KMG ah ee Dalka.

Guddiga, Guddoomiyaha iyo Gudoooomiye xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka waxay isla qaateen inay muhiim tahay in la qaato masuuliyad wadareed ku wajahan in dalka laga badbaadiyo wax kasta oo dhaawici kara degganaashaha siyaadadeed iyo midda amni ee Qaranka.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka waxaa uu Guddiga ka ballan qaaday inuu aqbalayo sharciyadda mooshinka muranka dhaliyay, diyaarna u yahay in lagu kala baxo si waafaqsan Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka iyo Dastuurka Dalka

Guddoomiyaha Golaha Shacabka waxaa uu ka codsaday Guddiga in lagu soo celiyo xaaladda amniga Xarunta Golaha Shacabka sidii uuu ahaa khilaafka ka hor.

Maarso 18, 2018 Guddoomiyaha Golaha Shacabka waxa uu ku dhawaaqay inuu aqbalay sharciyadda mooshinkii laga keenay.

## LA KULANKA GUDDOOMIYE XIGEENKA 1AAD EE GOLAHA SHACABKA

Maarso 17 2018, wax yar Ka dib markuu Guddigu usoo dhamaaday kulankii Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo ku-xigeenkiisa 2aad wuxuu kulan kale oo gaar ah la qaatay Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka oo aanu ka wada hadalnay nuxurka muranka hareeyay Golaha Shacabka, iyo sidii loo xallin karo.

Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad waxaa uu sheegay in khilaafku uu salka ku hayo diidmada Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee sharciyadda Mooshin laga keenay.

Guddigu waxaa uu ku wargeliyey Guuddoomiye xigeenka 1aad in ay la kulmeen Guddoomiyaha Golaha Shacabka, uguna baaqeen inuu u hoggaansamo Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka iyo Dastuurka, sidaas darteed uu aqbalay sharciyadda mooshinka laga keenay.

Guddigu waxay talo ahaan ugu soo jeediyey Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad qodobbadan soo socoda:

1. In uu ka qayb qaato sidii Ilaalada Xarunta Golaha Shacabka loogu soo celin lahaa sidii aya ahayd khilaafka ka hor
2. In uu ka shaqeeyo qabashada shirka Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacabka si loo agaasimo habraaca mooshinka ka yaala Guddoomiyaha Golaha Shacabka si waafaqsan qodobka 9aad farqaddisa 4aad ee Xeer Hoosaadka Golaaha Shacabka. Kaasoo qeexaya "in muddo 10 cisho gudahood lagu qabto."

Guddoomiye xigeenka 1aad waxa uu Guddiga ka ballanqaaday inuu labada qodobba ka hawl geli doono isagoo kaashanaya lana tashanaya dhinacyada ay khusayso.

## LA KULANKA RAIISUL-WASAARAHA JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA

Maarso 18 2018, Guddiga waxaa kulan la qaatay Wasiirka Kowaad (Ra-iisal Wasaaraha) Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya. Kulankaasi oo looga wada hadlay khilaafka Golaha Shacabka iyo sida looga hortagi karo inaysan saameyn habsami u socodka hannaanka dawladnimo.

Guddigu waxa uu ku talo bixiyey in lagu celiyo xaaladda amniga ee Golaha Shacabak sidii ay ahayd khilaafka ka hor.

Raiisul wasaaraha waxa uu ballan qaaday inuu ka hawl geli doono sidii loogu soo cellin lahaa ilaaladii hore u joogtay xaranta Golaha Shacabka, arrinkaana kala xiriiri doono Taliyaha Ciidanka Boliiska.

## LA KULANKA MADAXWAYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA.

Guddigu waxa uu warbixin buuxda oo ku saabsan xaaladda khilaafka Golaha Shacabka soo kale dhex galay, la wadaagay Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya sida; go'aanaddii ka soo baxay shirkii Guddiga Joogtada ee Aqalka Sare ee looga hadlay arrimaha Golaha Shacabka iyo magaacabista Guddiga Aqalka Sare iyo dhammaan shirarkii uu la galay dhinacyada ay khusayso.

Guddigu waxaa uu madaxwaynaha ka codsaday inuu soo fara-geliyo kalana shaqeeyo guddiga sidii xal waara looga gaari lahaa khilaafka Golaha Shacabka.

Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federalka waxaa u ballan qaaday inuu ka qayb qaadanyo doorkiisa dastuuriga ah si loo xaliyo khilaafka Golaha Shacabka.

## TALO SOO JEDINTA GUDDIGA

1. Guddigu waxa uu ka codsanayaa dhincayda khilaafku soo kale dhex galay ee Golaha Shacabka inay joojiyaan dhammaan ololaha siyaasadeed iyo fariimaha warbaahinta laysku wayadaarsanayo ee ku wajahan khilaafka mooshinka ka dhashay inta xal laga gaarayo arrimaha kale ee la xiriira khilaafkan.

2. Guddigu waxaa uu soo dhaweynayaa aqbalaadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka uu aqbalay Maarso 18, 2018 Sharciyadda Mooshinka khilaafka dhaliyay.

3. Guddiga waxa ugu baaqayaa Guddoonka Golaha Shacabka in la qabto shirka Guddiga Joogtada ah sida ugu dhaqsaha badan si loo agaasimo habraaca mooshinka ka yaal Guddoomiyaha Golaha Shacabka. Guddiga Aqalka Sare ee qayb qaadanaya xalinta khilaafka Golaha Shacabka waxa uu ballan qaadayaa inuu diyaar u yahay in uu kor-jooge (observer) ka noqdo.

4. Guddiga waxa uu so jeedinayaa in mooshinka maamulkiisa loo maro si waafaqsan qodobka "65"aad farqaddisa "4aad" ee Dastuurka Federalka Soomaaliya iyo Qodobka 9aad farqaddisa 4aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka iyo Dastuurka Federalka Soomaaliya.

5. Guddigu waxaa uu mar labaad u soo jeedinayaa Xukuumadda codsigii ahaa in Ciidankii sugayay ammaanka Golaha Shacabka lagu celiyo sidii uu ahaa khilaafka Golaha Shacbka ka hor.

## GUNAANAD

- Guddigu waxa uu mahad celinayaa dhammaan masuuliyintii soo dhaweysay, una fududdeysay Guddiga hawlaha xalinta khilaafaadka ee uu Guddigu ku hawlan yahay, oo uugu horeeyo, Madaxwaynaha JFS, Guddomiyaha Golaha Shacabka, Guddoomiye xigeennadiisa, Raiislul wasaraha iyo xubnaha Golaha Shacabka.

- Guddigu waxa uu mahad gaar ah u soo jeedinayaa xildhibaannada, Senatorrada Ururada Bulshada Rayidka (SOSCENSA) Culumu' diinka iyo hal doorka Soomaaliyeed ee dibad iyo gudahaba oo talooyin wax ku ool ah u soo gudbinayey Guddiga inta uu shaqada ku jiray.

DHAMMAAD